Gargaarada Cuntada oo Dheeraad ah oo loogu talagalay Qoysaska Inta lagu jiro Xiritaanka Dugsiga iyo Waxbarashada La Kala Joogo Meel Fog

EBT Cudurka Baahsan (P-EBT) ayaa taageero dhaqaale siiya qoysaska si loo daboolo kharashyada cuntooyinka dugsiga inta lagu jiro xiritaanka dugsiga, saacadaha iyo dhigashada dugsiga ee hoos loo dhigay, ama waxbarashada la kala joogo meel fog. Gargaarkani waxaa la siiyaa DHAMMAAN qoysaska carruurtoodu ay helaan cuntooyinka dugsiga oo lacag la'aan ah oo qiimaheeda hoos loo dhigay ee ka jira Oregon.

Wareega labaad oo ah EBT Cudurka Baahsan ayaa la bixin doonaa oo loogu talagalay sanad dugsiyeedka 2021-2020.

Cidmaa u qalanta?

Guri kasta oo leh carruur, haddii aanan loogu talagalin xiritaanka dugsiyada ama waxbarashada la kala joogo meel fog inta lagu jiro dillaaca COVID-19, wuxuu heli doonaa cuntooyin lacag la'aan ah oo qiimaheeda hoos loo dhigay iyada oo loo marayo dugsigooda oo ay ku jiraan kuwa dhigta dugsi halkaasi oo dhammaan ardayda la siiyo cuntooyin lacag la'aan ah inta lagu jiro shaqooyinka caadiga ah. Gargaarada waxaa la siin doonaa qoysaska leh carruur isqortay dugsiga K-12, barnaamijka dugsiga hortii ku saleysan, ama dugsiga ku saleysan Headstart ee sida caadiga uga qayb qaata Barnaamijka Qadada Qaranka ee Dugsiga.

Wareegan cusub ee P-EBT, carruurta da'doodu tahay 0-5 jir ee hesha SNAP ayaa sidoo kale heli doonto gargaarada P-EBT. Carruurta da'doodu tahay 6 jir oo hela SNAP ee aan weli isqorin dugsi ayaa sidoo kale u qalma balse qoysasku waxay u baahan doonaan in ay ka xaqiijiyaan Waaxda Adeegyada Dadweynaha si ay u helaan gargaarada.

Qoysasku waxay heli karaan EBT Cudurka Baahsan iyo habka qaadashada iyo tegista "grab and go" ee cuntooyinka la diyaariyay ee dugsiyadu bixiyaan labadoodaba inta lagu jiro cudurka baahsan.

Xaalada deganaansho dhibaato ma lahan marka la eego EBT Cudurka Baahsan. EBT Cudurka Baahsan looma xisaabin doono daraasadda lagu sameynayo gargaarada dowladdeed 'public charge'.

Waa immisa gargaarku?

Gargaarada la bixin doono waxay ku xiran yihiin xaalada dugsiga (si buuxda loo dhiganayo waxbarasho la kala joogo meel fog, isku dhafan, ama si buuxda shakhsi ahaan wax loogu dhigayo) inta lagu jiro bil lagu bixiyo dugsiga degmada ee ilmaha wax u qalma. Gargaarada bil kastaa waa:

- **Gargaarada buuxa = $136 bishii ilmihiiba**
  - Gargaarada buuxa waxaa la bixiyaa marka inta badan ardaydu inta badan dhanka internet-ka ku dhigtaan dugsiga
- **Gargaarada qayb ahaan = $75 bishii ilmihiiba**
  - Gargaarada qayb ahaan ayaa la bixiyaa marka ardaydu ku jiraan waxbarasho isku dhafan.
- **Ma jiraan gargaaro la bixin doonaa haddii ardaygu ku jiraan dugsi inta badan u shaqeeya shakhsi ahaan.**

Fadlan ogow gargaaradu way kala duwanaan karaan bil kasta. Tusaale haddii arday si buuxda u dhiganayay waxbarasho la kala joogo meel fog Oktoobar 2020 ilaa Maarso 2021, ku jiray waxbarasho isku dhafan Maarso 2021 ilaa Abriil 2021, iyo si buuxda oo shakhsi ahaan ah u dhiganayay Maajo 2021, qoyskaasi wuxuu heli doonaa isku darka gargaar buuxa, gargaar qayb ahaan ah, iyo gargaar la'aan, oo loogu talagalay bil kasta oo u dhiganta.

Goorma ayaan heli doonaa gargaarada EBT Cudurka Baahsan?

Gargaarada waxaa loo qaybin doonaa iyada oo laga soo bilaabayo taariikh hore 'retroactively' si loo daboolo cuntooyinka dugsiga ee ka soo bilaabmayay Oktoobar 2020 ilaa Maajo 2021 waxaana la qaybin doonaa laga bilaabo dhammaadka Luulyo 2021 ilaa Sibtambar 2021. Gargaarada laga soo bilaabayo taariikh hore oo loogu talagalay bilo badan ayaa la bixin doonaa hal mar iyada oo wax qaybinta la qorsheeyay dhacayso Luulyo, Ogoosto, iyo Sibtambar 2021. Gargaaradaasi ayaa noqon doona kuwo aad heli doonto si aad u isticmaasho sanad buuxa.

Sidee ayay u shaqeyn doontaa?

Gargaarada waxaa la bixiyaa iyada oo la adeegsanayo kaarka gargaarka ee ilmaha helaya gargaarada P-EBT. Wuxuu u shaqeeyaa sida kaarka deynta 'credit card' si cunto dukaanka looga soo gato.

Qoysas badan ayaa si toos ah u heli doona EBT Cudurka Baahsan.

- Haddii uu qoyskaagu helo SNAP, gargaarada EBT Cudurka Baahsan ayaa lagu dari doonaa kaarka EBT ee aad isla hadaba u isticmaasho SNAP.
- Haddii uu qoyskaagu hore u helay EBT Cudurka Baahsan, nidaamku sanadkan wax yar ayuu ka duwanaan doonaa. Ilme kasta oo ka tirsan qoys waxaa si toos ah gargaarada loogu siin doonaa kaar gooni ah - qoysas badan ayaa sanadkani heli doona kaararka gargaarka oo cusub. Kuwa weli haysta kaarka ay gargaarada PEBT ku heleen sanadkii la soo dhaafay, gargaarada waxaa lagu soo saari doonaa kaarkan oo loogu talagalay ilmaha ugu da'da weyn qoyska iyada oo kaararka cusubna loo soo saari doono oo wata gargaaro loogu talagalay wixii carruur ah ee kale.
  - Kaarka gargaarka ayaa boosta loogu diri doonaa inta badan cinwaanka cusub ee ku jira faylka oo loogu talagalay dugsiga ilmaha. **Haddii cinwaanka qoysku isbeddelay, fadlan la xiriir dugsiga degmada ee ilmaha muddo aan ka dambeyn Luulyo 20-keeda.**
  - **Haddii aadan hadda ka dib haysan kaarkaagii hore ee EBT Cudurka Baahsan, waxaad heli kartaa mid cusub** adiga oo wacaya khadka beddelaada Kaarka Cayrta ee Oregon, 1-855-328-6715 ama email u diraya OregonTrailCardDHS.Replacement@dhsoha.state.or.us.
- **Haddii uusan qoyskaagu helin EBT Cudurka Baahsan sanadkii la soo dhaafay, balse ay dhici karto in aad si cusub ugu qalanto cuntooyinka dugsiga oo lacag la'aan ah oo qiimaheeda hoos loo dhigay iyada oo sababtu tahay isbeddelada ku yimid dakhligaaga, fadlan buuxi codsiga cuntada lacag la'aanta ah ee qiimaheeda hoos loo dhigay muddo aan ka dambeyn Juun 20-keeda:** https://www.ode.state.or.us/apps/frlapp
  - Kaarka gargaarka ayaa boosta loogu diri doonaa inta badan cinwaanka cusub ee ku jira faylka oo loogu talagalay dugsiga ilmaha. Haddii cinwaanka qoysku isbeddelay, fadlan la xiriir dugsiga degmada ee ilmaha muddo aan ka dambeyn Luulyo 20-keeda.

Ayaan la xiriiraa haddii hayo su'aalo ku saabsan P-EBT?

Khadka PEBT kala xiriir 503-945-6481 ama email u dir EBTschoolmeals@dhsoha.state.or.us. Khadkani waxaa hawshiisa wada 211 waxayna caawimaad ku bixin karaan luqaddo badan.

Khadka iyo email-ka ayaa shaqeyn doona laga bilaabo Luulyo 1-keeda.

Partners for a HUNGER-FREE OREGON